

Tilmaamo Intaadan Raacin Gaadiidka



Jidadka iyo Goobaha uu tago

Fiiri lambarka baska jidka aad rabto oo ku qoran foodda sare ee baska. METRO waxay ka shaqeeyaan Portland, Westbrook, Falmouth iyo agagaarka Maine Mall (moolka) ee South Portland iyadoo kugu xiraya saldhigyada gaadiidka kale.



Calaamadda Meelaha basaku joogsadaan

U istaag baska halka aad calaamaddan ku aragto.

Mar walba waxa fiican inaad ka soo hormarto 5 daqiiqo xilliga jadwalka ku qoran. Gacanta ugu tilmaan si dirawalku kuugu joogsado. Waxa jira boqolaal meelood oo basku joogsado waddooyinka uu maro.

Fuulista Baska



Sug rakabka kale inta ay ka dagayaan baska inta aadan fuulin oo dirawalka tus kaarkaaga (ama bixi lacagta haddii aadan wadan kaarka).

Kuraasta hore waxa loogu talagalay waayeelka (duqayda) iyo curyaamiinta. Haddii aadan kursi helin, waad istaagi kartaa adigoo wax qabsanaya. Mar walba istaag meel ka danbaysa khadka jaallaha (huruudda) ah.



Ka Dagista Baska

Markaad rabto in basku joogsado, fadlan xarigga jiid ama riix khadka jaallaha ah ee daaqadaha ku teedan (garab socda). Taasi waxay u sheegaysa in dirawalku joogsado. Waxa jira xarko dadban iyo kuwo qotoma labadaba.



Dhamaan basasku waxay leeyihiin laba rako oo baaskiilka la saarto si aad u barato sida baska afkiisa hore baaskiilka loo saarto (iyo arrimo kale oo muhiim ahba) ka daawo internetka gpmetrobus.com.



Saldhigga weyn ee basaska ee Metro Pulse wuxu ku yaalla faras-magaalaha (baladka) oo geeska ka saaran dugsiga sare ee Portland, kana soo horjeeda maktabadda. Weydii su'aal, ka raac bas ama ka qaado jadwalkii ugu danbeeyey.

Waa maxay qiimaha lagu raaco baska?

Adeega GUDAHA: Portland, Westbrook, Falmouth iyo degaanka Maine Mall ee South Portland.

Qiimaha baska joogtada waa \$1.50

Qiimaha la dhimay waa \$.75 (waayeelka 65+ iyo curyaamiinta oo wata kaarka). Isticmaal sarif la mid ah.

Fadlan isticmaal sarif la mid ah. Darawalka sarif ma suubin karo.

Tigidhyada TenRide: \$13.50 / Tigidhyada TenRide la dhimay: \$6.75

Adeega METRO BREEZ EXPRESS u dhaxaysa Portland, Yarmouth iyo Freeport

Qiimaha joogtada waa \$3. Qiimaha la dhimay waa \$1.50

Tigidhyada TenRide: \$27.00 / Tigidhyada TenRide la dhimay: \$13.50



BEDDELAAYADA:

Weydii dirawalka beddelaad BILAASH marka aad fuusho baska hadii labo bas aad u qaadanaysid meesha u socotid. Beddelaayada loo ma isticmaali karo adeeg soo noqod iyo waqti go'an ayaa la isticmaali karaa. Beddelaayada waxaa loo isticmaali karaa METRO iyo adeegyada basaska South Portland.